

**UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"**

**Maanta** oo ay taariikhdu tahay **30/04/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

**WAKAALAD BIXIYE:-** MUSSE ABDULLAHI ARAB, Hooyo: Dahabo Muxumed Weheliye, Somali ah, Ku Dhashay: Xarardheere, Sanadkii: 08/09/1995, Sita: Somali Passport, Lr. P01190965, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya.

**LA WAKIISHE:-** HASSAN ABDULLAHI KHALIF, Hooyo: Faadumo Jimcaale Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Kenya, Sanadkii: 01/01/1988, Sita: Somali Passport, Lr. P01313093, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya.

**B-** Aniga oo ah **MUSSE ABDULLAHI ARAB**, ahna Gudoomiyaha Shirkadda **Hubaal Travel Agency Limited**, kuna leh Saami dhan **33.33%**, sida ku cad Warqadda Xeerka Dhismaha Shirkadda **Ref:7919/20, Tr.05/03/2020**, kana soo baxday Xafiiska Nootaayaha Garsoor, uuna ku saxiixanyahay Dr.Ibraahim Maxamed Axmed, waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **HASSAN ABDULLAHI KHALIF** Una Wakiishay dhamaan saamiga aan ku leeyahay Shirkadda **Hubaal Travel Agency Limited**, in uu ii gadi karo, iibin karo, wareejin karo, iina saxiixo karo duckmiintiyada la iiga baahanyahay ee wareejinta sheerkaas, iguna matali karo magaceeyga goob iyo madal walbo ee la iiga baahdo suul iyo saxiixba khuseysana dhamaan saamiga aan ku leeyahay shirkadda **Hubaal Travel Agency Limited**, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **HASSAN ABDULLAHI KHALIF** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga saamigaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

**T-** Aniga oo ah **HASSAN ABDULLAHI KHALIF**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **HASSAN ABDULLAHI KHALIF**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

**SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA**

MUSSE ABDULLAHI ARAB


**SAXIIXA LA WAKIISHAHA**

HASSAN ABDULLAHI KHALIF

1- SHUEIB ABDIRAHMAN AHMED


**SAXIIXA MARKHAATIYAASHA**

2- ABI HUSSEIN HAJI



**(XAFIISKA NOOTAAYAHA)**

**REP. 1546/T.P.N/25, Tr. 30/04/2025**, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **MUSSE ABDULLAHI ARAB** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **HASSAN ABDULLAHI KHALIF** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho. Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

**Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**







**GARSOOR**  
Public Notary

Taleex street, Hodan District,  
Mogadishu, Somalia  
+252 6 15 55 91 88 | 0625 55 91 88  
info@garsoorpn.com  
www.garsoorpn.com

No	Magaca	Tirada saamiga	Qiimaha saamiga	Qiimaha wadarta guud	Boqolkiiba
1	Hassan Abdullahi Khalif	28,6638 saami	\$1,000	\$28,663.8	33.33%
2	Musse Abdullahi Arab	28,6638 saami	\$1,000	\$28,663.8	33.33%

wadar guudna waa \$86,000/ (sideetan iyo lxx kun oo doolarka mareykanka Kabiya)

### QODOBKA 9aad.

#### **Tirada dadka Milkiilayaasha ah.**

- ❖ Sharikaddu waa saamiley ay lahamshaheeda leeyihiin labada qofood ee kor ku sheegan, hase yeeshee saamileydu waxay awood u leeyihiin inay ku soo daraan qofkii ay u gartaan ayagoo u samaynaya warqad caddeyneysa saamiga uu ku darsaday shirkadda.
- ❖ Maamulka sare ee shirkadda (Board Of Directors), waxa uu ka kooban yahay labada xubnood oo milkiilayaasha ah, waana hay'adda ugu sareysa Sharikadda, ayaga ayaana magacaabaya Xubnaha fulinta (Executive Officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.
- ❖ Xeer hoosaadka Shirkadda ayaa laga caddeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya Xeer hoosaadyada Milkiilayaasha Shirkadda. Waxa ayna Xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka Guud ee Shirkada.
- ❖ Qofkii lumiya xubnimadiisa ama iibsada saamigiisa oo dhan waxaa ka reeban inuu sii isticmaalo magaca iyo astaanta shirkadda.



### QODOBKA 10aad.

#### **Bugga Hantida Saamileyda.**

Bugga hantida Saamileyda waxaa ku cad qodobada soo socda:-

- inta uu la'eg yahay Qiimaha saami kasta, inta saami uu leeyahay xubin kasta, magaciisa/magaceeda, xaddiga uu dhiibay, taariikhda la dhiibay, lambarka boonada loo jaray iyo dhamaan warbixinadiisa oo tifatiran.
- Waxaa Kaydinaya Xoghayaha Maamulka sharikadda.
- Waxaa saxiixaya Maamulka Sharikada marka la dhamaystiro caddaymaha Saamiga & Saamilaha.
- Saamilaha waxaa la siinayaa shahaado caddeyneysa saamigiisa, Waxaana saxiixaya Maamulka Sharikada Iyo Saamilaha.

Saxiixa Milkiilayaasha Sharikadda

No	Magaca	Jagada	Saxiixa
1	Hassan Abdullahi Khalif	Guddoomiye	
2	Musse Abdullahi Arab	Xubin	

Ref: 7919/20

Tr: 05/03/2020

Sugitaanka Nootaayaha

Aniga oo ah Nootaayo Garsoor ee Muqdisho Dr Ibraahim Maxamed Axmed kuna leh Xafiis Nootaayo magaalada Muqdisho Deg. Hodan waddada Taleex, waxaan halkan ku caddeynayaa in Saxiixyada kor ku Qoran ee ku saabsan Aas'aasida Sharikad ka shaqeyneysa jarista Tikidhada Diyaaradaha, Dalxiiska, Xajka & Cunrada, Cargo and Forwarding, lana yiraahdo HUBAAL TRAVEL AGENCY LIMITED, ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee 1- Hassan Abdullahi Khalif 2- Musse Abdullahi Arab, waxa ay Nootaayada horteeda ku saxiixeen Xeerkan, ayaga oo miyir qaba cid qasabtayna aysan jirin, waana Sharikad ansax ah oo waafaqsan sharciga, waxaana lagu qoray diiwaanka Nootaayada.

**NOOTAAYAHA**

**Dr. Ibraahim Maxamed Axmed**





## FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 19/05/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/raxmaan C/laahi Kulan** oo ka Wakiil ah La Wakiishe **Muuse C/laahi Carab** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1546/T.P.N/25, Tr. 30/04/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

<b>Magaca La Wakiishaha</b>	Muuse C/laahi Carab
<b>Nooca</b>	Wakaalad Guud
<b>Loo Wakiishay</b>	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyaha Xasan C/laahi Khaliif
<b>Taariikhda Wakaalada</b>	30/04/2025

**Wakiilka La Wakiishe:** Aniga oo ah **C/raxmaan C/laahi Kulan**, Degan **MUQDISHO** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **Muuse C/laahi Carab**.

Sawir

### SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

**Maxamed Cabdi Cali**

### SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

**C/raxmaan C/laahi Kulan**

Wargadashay Xafiiska Woy la  
baxday waxaan xafuske Banantus  
logu geyay gobolka Shigella  
Wadany min la dhawo Ismaaciil  
Waxa gacanta ka Saaray  
C/raxmaan